

Goormaa Ilmaha la Tallaali Karaa

Da'aha	Hep B Cagaarshow nooca B	DTP diphtheria, teetano, xiiq (xiiq-dheer)	Polio Dabayl	MMR Jadeeco, qaamow- qashiir, jadeeco-jarmal	Hib <i>Fayruuska</i> <i>ifilo-weysada</i> <i>nooca B</i>	Varicella (Bus-bus)	PCV Tallaalka Nimooniyadda	Hep A Cagaarshow nooca A	Rotavirus	Ifilo-weysa (ifilo)
Dhalashada	✓									
2 bilood	✓	✓	✓		✓		✓		✓	
4 bilood	1-2 bilood kabacdi tallaalka ugu horeeya ee hep B	✓	✓		✓		✓		✓	
6 bilood		✓			✓		✓		✓	✓
12-18 bilood	✓ 6-18 bilood	✓ 15-18 bilood	✓ 6-18 bilood	✓ 12-15 bilood	✓ 12-15 bilood	✓ 12-18 bilood	✓ 12-15 bilood	✓✓ 2 talaal oo ugu yaraan 6 bilood isu jira		Deyr (fall) kasta*
Sharciga gobolku wuxuu dhigayaa in tallaaladaas la qaato bilowga is-diiwaan gelinta:	Fasalada K&7	Xanaanada ilmaha Fasalada K-12	Xanaanada ilmaha Fasalada K-12	Xanaanada ilmaha Fasalada K-12 (Waa in tallaalka la siiyaa marka uu ilmuhu hal sano jir noqdo ama wixii ka danbeeya)	Xanaanada ilmaha	Xanaanada ilmaha Fasalada K&7 (Waa in tallaalka la siiyaa marka uu ilmuhu hal sano jir noqdo ama wixii ka danbeeya)	Xanaanada ilmaha, da'aha 2-24 bilood			

Jadwalkani wax yar ayuu kala duwanaan karaa, waxayna ku xiran tahay dhakhtarkaaga iyo ilmahaaga.

***Ifilo-weysada (Influenza):** Dhamaan caruurta da'doodu u dhexeyso 6 bilood ilaa 18 bilood waa in talaal ifilo-weysa oo sanadle ah la siiyo – gaar ahaan kuwa qaba cuduro ay khatar uga imaan karto sida neefta iyo sokorowga/macaanka. Hadii canug 9 sano ka yar yahay isla markaana ifilo-weysa markii ugu horeysay laga tallaalo, wuxuu u baahan yahay 2 tallaal oo ay u dhexeyso 4 todobaad.

Sharciga Minnesota u yaala wuxuu uga baahan yahay ilmo kasta ee xannaano caruur oo shati leh lagu hayo in laga hayo cadeyn qoraal ah oo tallaalka qaarkood in uu soo qaatay cadeynaya. Laakiin, hadii xaalad caafimaad darteed aan ilmaha loo tallaali karin ama ay ilmaha waalidkood iyaga oo ogsoon ay ka soo horjeedaan tallaalka qaar ka mid ah ama tallaalka oo dhan, waxay heli karaan ogolaansho sharci ah oo lagaga deynayo tallaalkadii qasabka ahaa. Si aad u dalbato in lagaa daayo tallaalka qasabka ah waa in aad foom soo buuxisaa, kaas oo aad ka heli karto xarumaha xanaanada caruurta iyo iskoollada.



Immunization Program
P.O. Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5503, 800-657-3970
www.health.state.mn.us/immunize

When to Get Baby Shots/Somali
IC#141-1456 (3/2008)